

## FAAHFAAHIN DHEERAAD AH:

Hay'adda Hawlgabka Qaranka (KELA)  
www.kela.fi

Xafiiska shaqada iyo xoogsashada  
www.mol.fi

Booliska  
www.poliisi.fi

Buugga Adeegyada Naafada  
www.sosiaaliportti.fi/  
vammaispalvelujen-kasikirja

Warar Finland ku saabsan oo ku qoran  
15 af oo kala duwan  
www.infopankki.fi

Ururada naafada  
www.vammaisfoorumi.fi

Ururada dhaqamada kala duduwan  
www.moniheli.fi

Ururada isboortiga  
www.sul.fi  
www.vammaisurheilu.fi  
www.fimu.org

Buugga tilmaan bixiya ah ee loogu  
talagalay naafada waddanka u soo  
guurtey  
www.tukikeskushilma.fi/palveluopas



# Hilma

Xarunta Taageeridda Dadka Naafada ah ee  
waddanka u soo guurey ee Hilma  
Vammaisfoorumi ry  
www.tukikeskushilma.fi

VAMMAISFOORUMI  
Vammaisjärjestöjen yhteinen ääni



Si madax bannaani leh buu u jogaa,  
dadka kalena wuu la siman yahay

## QOYS

- Qof walba xaq buu u leeyahay inuu qoys yeesho oo lagu taageero.
- Qoys yeelashada darteed waxaa la dalban karaa caawimo, tusaale ahaan caawimo ah haynta carruurta iyo kala talinta arrimaha qoyska.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada.\*

## DEGGENAANSHAHA

- Qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay inuu doorto siduu u deggayo iyo meesha uu deggayo.
- Waxaa la dalban karaa in meesha la deggan yahay lagu helo noocyo kala duwan oo ah adeegyada guriga iyo degenaanshaha iyo taageero dhaqaale.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela).

## CAAFIMAADKA

- Qof walba xaq buu u leeyahay adeegyada caafimaadka.
- Qofka naafada ah daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah mooyee wuxuu kaloo dalban karaa tusaale ahaan baxnaanin (kuntoutus) ay Kela-du kharash ahaan taageerto.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo Hay'adda Hawlgabka Qaranka.

## WAXBARASHO

- Qof walba xaq buu u leeyahay waxbarashada aasaasiga ah.
- Dadka naafada ah xitaa xaq bay u leeyihiin inay helaan waxbarasho ah nidaamka guud ee waxbaridda. Si loo hubiyo inay waxbartaan, waxay xaq u leeyihiin taageero shakhsi ahaaneed sida, inay helaan qalabka waxbarashada oo iyaga ku haboon, caawiye iskuuldhigashada ka caawiya ama waxbarasho ay ku qaadanayaan iskuul khaas ah oo loogu talagalay.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada, Hay'adda Hawlgabka Qaranka iyo goobaha waxbarashada.

## SHAQO

- Qof walba xaq buu u leeyahay inuu shaqaysto iyo inuu helo dhaqaale uu ku noolaado.
- Si loo shaqaaloobo waxaa la heli karaa taageero ah sida, iyadoo la kaashanayo hagitaanka xirfad doorashada ama shaqaaloobidda la taageerayo.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo xafiiska shaqada iyo xoogsashada.

## DHAQAALAH LAGU NOOLAADO

- Qof walba xaq buu u leeyahay inuu helo dhaqaale aasaasi ah oo uu ku noolaado.
- Haddii aanay suuragal ahayn in la shaqaaloobo, qofku dhaqaalihii uu ku noolaan lahaa waxaa lagu sugi karaa, inuu helo lacagta hawlgabka, lacagta taageerada shaqa la'aanta ama lacagta taageerada dhaqaalaha nolosha.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo Kela-da.

## SOCODKA

- Qof walba xaq buu u leeyahay socod madax bannaani leh.
- Qofka naafada ah wuxuu raadsan karaa in laga caawiyo socodka, tusaale ahaan in laga caawiyo safarada uu taksiga u raacayo ama qof weheliya, markuu raacayo gaadiidka dadweynaha.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada.

## WAKHTIGA FIRAAQADA AH

- Sida dadka kale si la mid ah ayey dadka naafada ahna xaq ugu leeyihiin adeegyada isboortiga iyo dhaqanka.
- Adeegyada guud mooyee waxaa kaloo la dalban karaa sida adeegyada isboortiga ee loogu talagalay kooxaha khaaska ah.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo ururada shacabka.

## WARKA

- Qof walba xaq buu u leeyahay inuu ogaado warka isaga iyo bulshada khuseeya.
- Qofku waa inuu helaa wararka ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka, waana inuu helaa iyagoo ah qaab la fahmi karo, tusaale ahaan iyagoo af fudud ah ama iyadoo turjubaan la kaashanayo.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa degmadaada iyo ururada shacabka.

## TAKOORID LA'AAN

- Dadka naafada ah waxay leeyihiin xuquuqda bini aadanka iyo xornimada aasaasiga ah ee ay dadka kale leeyihiin oo kale.
- Takooriddu noocay doontaba ha ahaatee waa mabnuuc in qofka naafada ah la takooro ama loola dhaqmo si ka xun sida dadka kale loola dhaqmo.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa ururada naafada iyo booliska.

## XUQUUQDA KA QAYBQAADASHADA

- Xuquuqda aasaasiga dadka oo dhan baa leh
- Qof walba xaq buu u leeyahay tusaale ahaan, xornimada hadalka, waxqabadka urur iyo saamayn ku yeelashada bulshada.
- Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa ururada shacabka.

\* Degmadaadu waa degmada aad sida joogtada ah u deggan tahay ee ka tirsan tahay. Adeegyada degmada waxaa qabanqaabiya tusaale ahaan, daryeelka arrimaha bulshada qaybteeda adeegga naafada iyo adeegga qoysaska iyo adeegga guriga.